



## Fiiro

Marka badhitaanka tiibaydu sheego cudur waxa uu caadi ahaan sheegi doonaa isla sidaa sannado badan, xiitaa ka dib marka la qaato dawada INH. Haddii loo baahdo cadeyn baadhitaan "Tuberculin", tus cadeynta hoose.

### Baadhitaanka Maqaarka ee "Tuberculin" (PPD)

Magaca: ______________________

Taariikhda baadhitaanka: ______________________

Taariikhda/wakhtiga lagu soo noqonayo kiliinigga ama xarunta caafimaadka si lo eego natiijaada:

______________________

______________________

Taariikhda la eegay: ______________________

Natiijooyinka (mm): ______________________

Haddii natiijooyinku cudur sheegayaan, tariikhda/wakhtiga ballanta raajada laabta:

______________________

Waaxda Caafimaadka Degmada

The Florida Department of Health

TB Program

DH 150-819, 10/04



# Baadhitaanka Maqaarka ee "Tuberculin"

waxa uu sheegaa:
Yaa cudurku soo gaadhay?
Macnihiisu se waa maxay?

# Tiibay

Somali Version

## Waa Maxay Tiibay?

Tiibay ama tiibisho (TB) waa cudur qofka qaabaa qofka kale qaadsiiyo iyadoo cudurku sii marayo hawada. Waagii hore, waxa afka Ingiriisiga tiibayda (TB) lagu odhan jiray "consumption". Jeermiga tiibaydu (TB) waxa uu hawada ku fidaa marka qofku qufaco, hindhiso, qoslo, ama heeso. Tiibadydu (TB) waxay caadi ahaan ku dhacdaa sambabka laakiin waxa kale oo ay gali kartaa qaybaha kale ee jidhka, sida maskaxda, kalyaha, ama laf-dhabarta. Dadka qaarkii ee uu soo gaadhay jeermiga tiibaydu (TB) waxay yeellan doonaan cudur tiibay (TB).



## Calaamadaha Tiibayda

Calaamadaha caadiga ahi waa qufac mudo dheer jira, daal, dhidid habeenkii ah, miisaanka oo yaraada iyadoon sababta la garanaynin ama qandho, nafsadda ama rabitaanka cuntada oo luma ama dhiig la qufaco. Badanaa calaamadda kaliya ee jirtaa waa qufac aan tagaynin. Calaamadahaasi badanaa waxay kaloo calaamado u yihiin cuduro kale, haddaba si lo hubsado u tag dhakhtar.

## Baadhitaanka Maqaarka

Ulajeedad baadhitaanka maqaarku "tuberculin" waxa weeye si loo ogaado haddii jeermiga (bakteeriyada) sababa tiibayda (TB) uu ku soo gaadhay.

## Sidee Baa Loo Sameeyaa Baadhitaanka?

Qadar yar o ah borootiinka "tuberculin" oo aan waxyeello lahayn ayaa lagu mudaa lakabyada sare ee maqaarka, badanaa waa maqaarka gacanta.

## Waxa Baadhitaanku Muujiyo

Barta baadhitaanka lagu sameeyay waxa la eegaa 48 ilaa 72 saacadood ka dib baadhitaanka. Haddii baadhitaanku aanu WAXBA sheegin ama wax sii weyn aanuu sheegin, taa macnaheedu waxa weeye ma qabtid jeermiga tiibayda (TB). Hase yeeshee, dawooyinka qaarkood ama xaaladaha caafimaadka qaarkood ee saameeyaa habka difaaca jidhka ayaa sababi kara natiijo baadhitaan oo ah waxba lama arag. Ka hor intaan lagaa qaadin baadhitaanka maqaarka, kala hadal taa qofka sameynaya baadhitaanka.

Haddii baadhitaanku sheego CUDUR ama wax weyn (barta baadhitaanka lagu sameeyay ayaa lagu arkayaa barar, casaan/ama finan biyo leh), macnaheedu waxa weeye waxa ku soo gaadhay tiibay, imminkana waxa jidhkaaga ku jira jeermiga sababa cudurka tiibayda. Waxa laga yaabaa inaan macnihiisu ahayn inaad qabtid cudurka tiibayda ama inaad qaadsiin kartid dadka kale. Waa in la qaado raajo laabta ah, iyo marmarka qaarkood baadhitaano kale, si loo arko haddii aad qabtid tiibay. Marrarka qaarkood waxa baadhitaanka lagu sheegi doonaa mid "aan waxba laga garan". Waxa markaa lagama-maarmaan noqon doonta in baadhitaanka lagu celiyo. Qofka baadhitaanka sameynaya ayaa sharixi doona sababta ku-celinta loogu baahan yahay.

## Waa Ayo Dadka Ay Tahay in la Baadho?

Dadka halis sare u ah soo-gaadhis tiibay oo joogto ah waa in dib loo baadho wakhtiyo go'an. Dadka xidhiidh la yeeshay qof qaba tiibay firfircoon waa in sida ugu dhakhsaha badan loo baadho. Sidoo kale waa in la baadho qofka laga yaabo inuu qabo ama qababa fayraska HIV.

## Sidee Buu Cudurku ku Fidaa?

Jeermiga tiibaydu waxa uu galaa sambabkaaga marka hawada la neefsanayo aad la wadaagtid qof qaba cudur tiibay oo firfircoon. Waxa caadi ahaan taasi ka dhacdaa guriga, meesha aad ka shaqeysid, ama meesha inta badan aad ku qaadatid wakhtigaaga firaaqada. Kama qaadaysid cudurka kullan gaaban ama dhif ah oo ka dhaca banaanka hawada leh. Badanaa meesha cudurku ka yimi lama yaqaano waxana laga yaabaa in adiga oo aan ogeyn cudurku ku soo gaadhay sannado hore.

## Maxaa Aan Sameyn Karaa?

Marka cudurku ku soo gaadho, waxa aad yeellan kartaa cudur tiibay (TB) wakhti kasta oo ka mid ah noloshaada. Haddii raajadaada laabtu ay caadi tahay isla markaana aanad lahayn wax calaamado ah, waxa laga yaabaa in lagu taliyo dawo si loo joojiyo cudurka imminka iyo wakhtiga soo socda. Dawada inta badan daweynta loo isticmaalo waxa la yidhaahdaa Isoniazid (INH) waana in la qaato maalin kasta mudo ah 6 ilaa 9 bilood, taasoo ku xidhan talada dhakhtarkaaga.

## Waa Kee Qofka la Rabo Inuu Qaato INH?



Waxa aad muhiim u ah in dadka cudurku soo gaadhay ee halis sare u ah inay yeeshaan cudur tiibay (TB) ku talogalaan qaadasho dawo. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharixi doona sida aad halis ugu tahay cudurka. Dadka cudurku soo gaadhay ee isu-dhawaansho mudo dheer socotay la lahaa qof qaba cudur tiibay (TB) ayaa laga soo qaadaa inay halis are u yihiin cudurka. Dadka cudurku soo gaadhay ee halis sare u ah inay yeeshaan cudurka tiibay (TB) waxa tusaale u ah dadka qaba HIV, dadka lagu arko "tiibay hore" marka laga qaado raajo laabta ah, ama dadka leh dhibaatooyin caafimaad qaarkood (sida sonkorta ama kaadi-macaanta).

## Ka-hortaggu Waa Muhiim

Ka-hortagga tiibaydu waxa uu muhiim u yahay caafimaadkaaga waxa kale oo uu muhiim u yahay caafimaadka dadka kuu dhow.

Haddii aan lagu talin inaad dawada qaadatid ama haddii aanad dhameysan daweynta, waa inaad ka warqabtid calaamadaha iyo tilmaamaha lagu yaqaano cudurka tiibayda (TB). Haddii aad isku aragto wax ah calaamado, isla markiiba raadso gargaar dhakhtar.